# HAWLGALKA QARAMADA MIDOOBAY EE KAALMADA SOOMAALIYA (UNSOM)

War Deg Deg Ah

**WARSAXAAFADEED 03/2013**

## Kaaliyaha Xoghayaha Guud Feltman oo Muqdisho booqday, kuna ballanqaaday taageero

**Muqdisho, 27 Juun 2013 –** Mas'uulka ugu sarreeya ee Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha siyaasadda, Jeffrey Feltman, ayaa booqasho ku yimid Soomaaliya manta si uu u muujiyo taageeradiisa, taasoo imanaysa ka dib markii dhowaan la weeraray Xarunta/ Xerada Qaramada Midoobay ee magaalada Muqdisho, iyo si uu u xaqiijiyo in Qaramada Midoobay ay ka go'antahay inay sii wado taageerada ay u fidiso Dowladda iyo dadka Soomaaliyeed. Weerarkii lagu qaaday Xarunta Qaramada Midoobay 19kii June waxaa ku dhintay qof ka mid ah shaqaalaha Qaramada Midoobay, saddex ka mid ah shaqaalaha qandaraas ahaan halkaa uga shaqeeya, afar ka mid ah ilaalada/waardiyeyaasha Soomaaliyeed iyo dad rayid ah oo aan waxba galabsan. Tani waa booqashadii labaad ee Kaaliyaha Xoghayaha Guud ee Arrimaha Siyaasadda uu ku yimaado Soomaaliya sannadkan.

Kaaliyaha Xoghayaha Guud Feltman wuxuu la kulmay Madaxweynaha Soomaaliya, Mudane Xasan Sheekh Mahmuud, diblomaasiyiinta joogta Soomaaliya iyo shaqaalaha Qaramada Midoobay ee ku waxyeelloobay weerarkii toddobaadkii hore, wuxuuna uga tacsiyeeyay shaqaalihii weerarka ku dhintay.

"Waxaan weligeena laabta iyo maanka ku hayn doonaa xusuusta shaqaalaheena ee lagu dilay weerarkan naxariis darrada ah, waxayna xusuustan xoojin doontaa go'aankeena anagoo sii wadayna hawsha muhimka ah ee aan ka hayno Soomaaliya. Qaramada Midoobay lama cabsin doono, waxaana naga go'an inaan joogno oo aan la wada shaqeyno dadka Soomaaliyeed si ay u gaaraan mustaqbal ifaya oo wacan ee ka dhasha dalkooda", ayuu yiri Kaaliyaha Xoghayaha Guud Feltman.

Isagoo shaqaalaha la hadlaya, Feltman wuxuu yiri: "Waxaan aad iyo aad ugu faananynaa qof kasta oo idin ka mid ah, waxaana idinku mahadnaqayaa geesinimadiina and hawl-jeceylkiina."

Kaaliyaha Xoghaya Guud Feltman wuxuu ka hadlay amniga iyo tallaabooyinka loo qaaday badbaadinta hawlgallada Qaramada Midoobay ee Soomaaliya.

"Qaramada Midoobay waxay halkan u joogtaa inay dalka kaalmeyso ayna u fidiso taageer muhim ah, isagoo hadda maraya xilligii ugu fiicnaa ee soo mara 20kii sanno ee la soo dhaafay", ayuu yiri Kaaliyaha Xoghayaha Guud Feltman.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xidhiidh Sarkaalka UNSOM u Qaabilsan Warbaahinta
Mr. Ben Parker • + 252 699 280 697 or +252 616 142 177 • Email: unsom-spokesperson@un.org
**Fadlan eeg rugta Internet-ka:**
**www.unsom.unmissions.org**
**@UNSomalia** **facebook.com/UNSOMALIA**